Ducada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa ugu badnaa "Allahayow, Rabiyow, Adduunka nagu sii kheyr, Aakhirana nagu sii kheyr, nagana ilaali cadaabta Naarta-ee Aakhiro

Anas Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Ducada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa ugu badnaa "Allahayow, Rabiyow, Adduunka nagu sii kheyr, Aakhirana nagu sii kheyr, nagana ilaali cadaabta Naarta-ee Aakhiro."
[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa mid badiya ducada ducooyinka kulmisa, waxaana ka mida: ''Allahayow, Rabiyow Adduunka nagu sii khayr, Aakhirana nagu sii khayr, cadaabta Nartana naga dheeree'', Ducadaasi waxay koobaysaa xasanada Adduunka ee ah risiq wanaagsan oo waasic ah, xaas wanaagsan, ubad indhuhu ku qabawsadaan, raaxo iyo cilmi wax tar leh, camal saalix ah, iyo wixii la mida ee wax yaabaha wanaagsan ee la jecel yahay ah ee mubaaxa ah, xasanada Aakhirana wuu kaga badbaadayaa ciqaabta Qabriga, iyo marka la taagan yahay Maxsharka, iyo inuu helo Raali ahaanta Ilaahay, kuna guulaysito nicmada joogtada ah, iyo Rabiga Raxiimka ah u dhawaantiisa.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5502